

## Turjubaad

Waxa aad heli kartaa turjubaan hadii dhakhtarkaagu uu u doonayo daawaynta. Turjubaadu waa u bilaash shakhsiyadka deganaa Denmark wax ka yar 3 sano.

Kharashka turjubaada waa lagaa qaadi doonaa hadii aad degan tahay Denmark wax ka badan 3 sano. Hadii ay tahay in aad lacag bixiso turjubaada bilaashka ah, waxaa lagaaga soo diri doonaa qaansheeg deegaankaaga. Waxa aad ku heli doontaa qaansheegta e-Boks-gaaga ama boosta caadiga ah.

## Qiimayaasha

- Turjubaada fiidyawga/taleefanka ee booqashooyinka isbitaalka, latalinta xirfadlaha guud iyo xirfadlayaasha khabiirada ah ee guud. DKK 191
- Turjubaanku marka uu yimaado booqashada ibitaalka, latalinta xirfadlaha guud iyo xirfadlayaasha khabiirka ah ee guud. DKK 334
- Turjubaada fiidyawga/taleefanka ee marka lagu dhigayo isbitaalka: DKK 957. Kharashka waxaa lagaa qaadi doonaa markaliya, inta maalmood ee aad doonto aad ku jirtid isbitaalka.
- U imaatinka goobta ee turjubaanka ee qofka la dhigayo isbitaalka: DKK 1,675. Kharashka waxaa lagaa qaadi doonaa markaliya, inta maalmood ee aad doonto aad ku jirtid isbitaalka.

## Kharashka turjubaanka lagaa qaadi maayo:

1. Bukaanada qaba laxaad la'aanta kumeel gaadhka ah ama mudada dheer ah ee jidhka ama maskaxda ee laxaad la'aantaasi ay tahay awooda waxbarasho, hadalka iyo fahanka Danish-ka.
2. Caruurta yimaada balanta iyada oo aanu waalid la socon.
3. Waalidka u baahan turjubaan inta la dawaynayo ilmaha.
4. Dhakhsiyadka kamid ah Dadka Laga Tirada Badan Yahay ee Jarmalka ee u baahan turjubaada luuqada Jermalka.

Kharashka turjubaada lagama qaadi doono wixii ah turjubaad ee luuqadaha Greenlandic iyo Faroese.

## Waxyabaha laga soo reebey xanuunada jidhka ama maskaxda

Hadii lagagaa soo reebey siday dhigayso qaybta 1, waa inaad la xidhiidhaa dhakhtarkaaga ama dhakhtarka, kugu dawaynaya isbitaalka oo aad ka dalbataa dhakhtarka inuu ku qiimeeyo hadii aad buuxisay shuruudaha iyo hadii kale. Hadii aad leedahay shuruudaha kasoo reebida, dhakhtarkaagu waxa uu u diri doonaa waraaqahaaga Deegaanka Denmark ee Dhexe, oo markaa wax danbe inaad samayso lagaagama baahna.